

Ku soo dhowow baadhitaan ah saami kontrool oo ku saabsan baadhitaan unug oo ah dumarka hoostooda (gynekologisk cellprovskontroll)

Baadhitaankaas waxa loogu talo galay si looga hor tago kansar ku dhaca ilmo galeenka cunihiisa. Badanaa is bedelada unugu khatar maaha loomana baahna in la daweeyo laakiin qaar ayaa isu bedeli kara kansar. Markaa hadii la sameeyo baadhitaan soo noq-noqda oo lagu kontroolo unuga lana daweeyo hadii la arko in wax isbedel ah oo khatara jiraan markaa waxaad heleysaa difaac fiican oo lagaga hor tago kansarka gala ilmo galeenka cunihiisa.

Is bedelada unuga lagama arko wax calaamad ah ama lagama dareemo xanuun markaa waxaa lagu heli karaa oo keliya hadii kontroolka baadhitaanka unuga la sameeyo. **Sidaas daraadeed waa muhiim inaad aado kontroolka marka lagu yeedho.** Waxaa la sameeyaa sadexdii sano hal mar hadii ay da'daadu u dhexayso 23 ilaa 50 sano iyo shantii sano hal mar hadii aad tahay 50 ilaa 60 sano.

Baadhitaanka waxaa lagu sameeyaa kursiga lagu baadho dumarka hoostooda waxaana samaysa umuliso. Wakhti dheer ma qaadato xanuuna maaha.

Waa inaad caado wadanin marka baadhitaankaas lagaa qaadayo isku day inaad galmo samaynin (nin u tegin), siboosto is gelinin, aanad kareem hoosta iska marin iyo inaad gudaha hoosta dhaqin laga bilaabo maalinta ka horeysa ilaa iyo maalinta uu baadhitaanku dhamaanayo. Hadii aanad weligaa galmo samayn (nin u tegin) uma baahnid inaad baadhitaankan samaysid.

Mar walba waxaa guriga laguugu soo dirayaa waraaq ku saabsan jawaabta/natiijada. Waxay jawaabtu badanaa timaadaa afar ilaa lix wiig gudahood. Hadii baadhitaanku tuso in unuga wax is bedel ah ku dhaceen taas oo u baahan in la daweeyo ama baadhitaanka la sii wado markaa waxaa laguugu soo dirayaa wakhti cusub si uu dhakhtar kuu sii baadho.

Meesha aad aadaysid iyo wakhtiga waxay ku qoran tahay meesha magacaagu ku qoran yahay bidixdeeda. Baadhitaanku wuxuu joogaa 100 karoone. Soo qaado warqada laguugu yeedhay ee af-iswidhiska ku qoran (remissen) maalinta lagu baadhayo.

Hadii aad doonaysid inaad wax kale ka sii ogaato baadhitaanka unuga waxaad ka akhrisan kartaa boga internetka www.cellprov.nu

Si loo ilaaliyo oo si fiican looga feejignaado qofka buka arimihiiisa oo fursad loo heli karo in kontrool danbe la sameeyo iyo in si fiican loo sii raad raaco waa la kaydiyaa baadhitaanka unuga oo waxaa lagu kaydiyaa meesha shaybaarka waxaana baadhitaanka unuga lagu sameeyaa isku duba rid lagu qoro fayl. Aqoonsiga qofka waa mid dahsoon oo la qariyo. Hadiise aanad doonayn in baadhitaankaaga la kaydiyo u sheeg marka lagu baadhayo.